

Xeer-Sharci lamba 20 ee 30 Oktober 1965

Xeerarka khuseeya habeynta guud iyo kormeerka Hey'adaha Dowliga ah

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qod. 63 ee Dastuurka;

Kadib markii la garawsaday baahidda loo qabo in la soo saro xeerar ku saabsantoosing kharajka howlaha xafiisyada iyo adeegyada Hey'adaha Dowliga ah oo ka howl gala dhinaca maaliyadda iyo kormeerka;

Kadib markii la tixgeliyey soo jeedinta Wasiirka Maaliyadda;

Kadib markii la dhegeysta soo jeedinta Golaha Wasiiradaha.

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

Iyadoo la tixgelinaya in la dhinac mari karo amarrada sharciga iyo xeerarka, wuxuu Wasiirka Maaliyada isagoo kaashanaya Wasiirada awooda iska leh soo saari kara xeeryiin ama xerar loo tala galay habeynta kharajka howlaha xafiisyada iyo adeegyada Hey'adaha Dowliga ah.

Qod. 2

Xubnaha Hey'adaha Dowliga waxaa ka mid ah: Guddomiyaha, Guddigayada, Agaasimaha, Guddonka, Guddonka – Habeynta Xisabaadka ama Guddonka Duqa Magaaloyinka.

Qod. 3

Dhaqaalaha oo ay ka mid yihiin gunnoyinka ama wixii kale oo la siidin doono Guddomiye aa Agaasime ama shaqaalaha kale ee Hey'adaha Dowliga waxaa lagu soo carifi doona Xeer oo soo saray Madaxweynaha Jamhuuriyada kadib markii uu la tashtay Wasaarada u qaabilsan ee Wasaaradda Maaliyada isagoo la tashtay Golaha Wasiiradaha.

Qod. 4

1. Wasiirka Maaliyadda wuxuu awood u leeyahay in uu kormeer iyo baaris ku qaado qabka maaliyada ee Hey'adaha Dowliga ah;
2. wixii natiijo oo ka soo baxdo baarista ama kormeerkaasi wuxuu u gudbin doona Golaha Wasiirada si loo saaro go'aanka loo baahdo.

Qod. 5

1. Kadib markii laga reebo marxaladda ku carifan faqradda 1aad ee qodobka sare, xubnaha kormeerka ee Dowladda waxay qeyb ka qaadan doonan aamulka maaliyadda ee Hey'adaha Dowliga oo ay ka mid yihiin Bangiga Qaranka Somaliyeed iyo Bangiga Amaahda Somalida;
 - a) Haddii hantida si toos ama si dadban ay Dowladda ama Hey'ad Dowliga ah ama kuwa dibedda ku shubtay si nus ama dhameys tiran lacag ka badan Sh.So 50.000.
 - b) Haddii, kaxadib markii laga reebo maarxaladda ku xusan faqradda a) ay Dowladda ama hey'adda Dowliga ama kuwa dibedda ay bixiyaan si kash ama hanti ah ama heshisyada oo lacag ka badan Sh.So. 50.000.
2. Haddi ay dhacdo marxaladda ku carifan b) ee faqradda sare, kormeerku wuxuu noqon doonaa isla sanad maliyeedka bixiyey lacagta ama cawiaadyada ama sanadka ku xigey oo lacagahaasi la wareejiyey.

Qod. 6

1. Wixii natiijo oo ka soo baxao waxaa iyadoo la xusayo qodobka sare ku xusan loo gudbin doona Hey'adaha Kormeerka ee Wasaarada u xilsaaran iyadoo ogeysiis la siin doona Rai'sul Wasiirka iyo Wasiirka Maaliyadda;
2. Wixii natiijo ah waxaa lagu diri doonaa warbixinta sanadlaha ee Hey'daha Dowliga ee kormeerka ah.

Qod. 7

Saraakiisha Hey'adaha Dowliga ee kormeerka waxay ka mid noqon doona hey'adha kormeerka ee gudaha ee Hey'adah Dowliga ah.

Qod. 8

1. Haddii loo baahdo iyadoo la tixgelinaya Wasiirka u qaabilsan iyadoo asbaabo loo yeelo waxaa la go'aamin doonaa:
 - a) In si ku meel gaar ah loo dhiibo maamulka Hey'adda Guddomiye ku meel gaar ah;
 - b) In la baa'biyo Hey'adda iyado loo magacaabi doono Guddomiye ka howl gala.
2. Labada marxaladood waxaa lagu dhaqmi doona xeer oo uu soo saray Madaxweynaha Jamhuuriyadda oo tixgeliyey aragtida Golaha Wasiiradaha.

Qod. 9

Wixii hanti ah ee ka soo baxda baa'binta Hey'adda waxaa xeer Madaxweynaha oo tixgeliyey Wasiirka Maaliyadda iyo Golaha Wasiirada la siin doona Dowladda ama Hey'ad kale oo Dowli ah.

Qod. 10

Sharci kasta ee hor imaanaya ama khilaafaya Dekreetada waa la buriyey.

Qod. 11

1. Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco, waxaana la horgeyn doona Golaha Qaranka si sharci loogu beddelo sharci sida ku qoran qod. 63 ee Dasturka.
2. Dekreetadaan-Sharci waxaa lagu keydin doona Keyda rasmiga ah ee Shuruucda iyo Xeeryinka Jamhuuriyadda Somaliya waxaana lagu faafin doonaa Faafinta Rasmiga ah.
3. Waxaa la farayaa cid kasto in ay u hoggansato sharcigaan una hoggamiso qof kasto.

Muqdisho, 30 Oktober 1965.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha Ku-meel-gaarka ah
Abdulqadir Mohamed Aden

Wasiirka Maaliyadda
Awil Haji Abdullahi